


# Adeegyada shaqo helitaanka ee Vantaa iyo Kerava

Magaalooyinka Vantaa iyo Kerava waxaa ay awooddooda isugu geeyeen sidii ay xafiska shaqada ugala shaqeyn lahaayeen, hirgelinta adeegyada shaqo helitaanka laga bilaabo 1.3.2021.



Onnistumisia yhdessä



Vantaa



kerava



Työllisyyden  
kuntakokeilut

Magaalooyinka Vantaa iyo Kerava waxaa ay awooddooda isugu geeyeen sidii ay xafiiska shaqada ugala shaqeyn lahaayeen, hirgelinta adeegyada shaqo helitaanka laga bilaabo 1.3.2021. Hadafkeenu waa sidii aan kaaga caawin lahayn shaqo helitaanka ama waxbarashada iskuulka. Waxaad heleysaa tababare kuu gaar ah, kaasoo kaa caawinaya shaqo helitaanka.

## Ma tahay qof shaqo doon ah? Samee sidan soo socota:

1. **Soo sheeg** dhammaanba wixii isbeddel ah oo xaaladdaada ku saabsan (tusaale ahaan. shaqaaleysiinta ama qorshaha waxbarashada). Wixii isbeddal ah ee xaaladdaada ku saabsan waxaad ku soo sheegi kartaa dhanka internetka ee adeegga loo yaqaan (Oma asiointi -palvelu), amaba waxaad si toos ah ula soo xiriiri kartaa tababaraahaaga.
2. **Xusuusnoow** inaad samayso howlihii lagu ballamay ee qorshahaaga shaqaaleynta, kuwa aad samaysayna waxaad ku dhax calaamadisaa adeegga internetka ee loo yaqaan (Oma asiointi -palvelu), kaasoo aad ka geli karto bogagga inetnetka ee cinwaannadoodu kala yihiin sidan soo socota: (vantaanjakeravantyollisyyspalvelut.fi; te-palvelut.fi).
3. Marka aad oggolaato in aad ka qaybqaadato adeeg ka mid ah adeegyada, **ku soo gudbi** foomamka lagaa codsaday waqtigii loogu talaggalay, waxaana ugu fiican in aad ku soo gudbiso 10 maalmood gudahood oo maalmaha shaqada ah, kahor inta aan adeeggu bilaaban. Foomamka waxaad ku soo diri kartaa qaab elektoroonig ah, adigoo u soo maraaya dhanka adeegga (Oma asiointi -palvelu), ama boostada ayaad ku soo diri kartaa adigoo ku soo hagaajinaaya adeegyada shaqaalaysiinta, amaba si toos ah ayaad u imaan kartaa barta ama xafiiska dano dhammaysiga.

## Haddii aan caawimaad u baahdo, yaan la soo xiriirayaa?

Adeegyada shaqaaleysiinta waxaad ka heleysaa tababare kuu gaar ah adiga, kaasoo kaa caawin doonaa dhammaanba wixii la xiriira arrimahaaga shaqaalaysiinta, islamarkaana wuxuu talo kaa siin doonaa arrimaha howlwadeennada dowladda ee la xiriira shaqo la'aanta. Waxaad tababaraahaaga u reebi kartaa codsiga ah in uu kula soo xiriiro, adigoo ugu reebaaya dhanka adeegga internetka ee loo yaqaan (Oma asiointi -palvelu).

## Waa maxay adeegyada ay magaaladu aniga ii fidinayso?

Adeegyada degmadaada ay bixiso waxaa ka mid ah kuwo si aad ah loo yaqaan oo kuu sahlaaya sidii aad shaqo ku heli lahayd, waxaana ka mid ah, taageerada mushaarka (Palkkatuki), tababarka xirfadda shaqo iyo shaqo codsashada, aqoonkororsi shaqo, tijaabo shaqo, iyo waxbarasho qofku iskiis u raadsado, isagoo ku dhiganaaya gunnada ama lacagta shaqo la'aanta. Waxaa kaloo degmadu ay bixisaa adeegyada laqabsiga waddanka oo ah kuwo sharciga ku salaysan. Waxaa intaas dheer in Vantaa iyo Kerava ay leeyihiin adeegyo kale oo iyaga u gaar ah.

## Ma la ii samaynaaya aniga qorshaha shaqaalaysiinta?

Haa, qorshaha shaqaalaysiinta waxaa loo samayn doonaa sidii hore oo kale. Qorshihii hore loo dejiyay iyo howlihii lagu heshiiyay in la sameeyo, waa kuwo waajib ku ah qofka in uu sameeyo, illaa iyo inta qorshaha shaqaalaysiinta laga cusboonaysiinaayo, adigoo la jooga tababaraaha adiga kuu gaarka ah.

## **Telefoonada adeegga iyo xilliyada adeegga**

### **Adeegyada macmiilka shakhsiahaaneed**

09 8395 0120

Xilliyada uu furan yahay isniin-jimce 9-16

### **Adeegyada shaqo bixiyaha**

09 8395 0130

Xilliyada uu furan yahay isniin-jimce 9-16

### **Adeegyada luqadaha kala duwan**

09 8395 0140

Xilliyada uu furan yahay isniin-jimce 9-16

**vantaanjakeravantyollisyyspalvelut.fi** Bogagga internetka ee adeegyada shaqo helitaanka Vantaa iyo Kerava, kuwaasoo aad ka heli karto waxyaabaha ay ka midka yihiin, halka aad kala xiriiri karto degmooyinka kala duwan.

**kuntaliitto.fi/tyollisyyskokeilut** Bogagga internetka ee heer qaran, kuwaasoo ay degmooyinku ku tijaabinayaan qaababka shaqo helitaanka.

**te-palvelut.fi** Waa adeegga kuu gaarka ah ee loo yaqaan Oma asiointi -palvelu. Waxaa laga helayaa waxyaabaha ay ka midka yihiin, codsiga soo wicitaanka ama la soo xiriirista, soo wargelinta wixii isbeddel ah ee xaaladahaaga ku dhacay, ama soo diiwaangelinta shaqo codsashada.

Adeegga loo yaqaan (Oma asiointi -palvelu) wali sidiisii ayaad u sii isticmaali kartaa, sidoo kale adeegyada telefoonada heer qaran ee xafiiska shaqada wali sidoodii ayay adiga kuugu adeegayaan.

**kela.fi** Arrimaha ku saabsan lacag siinta ee loogu talaggalay macaamiisha xafiiska Kela-da.

**tyj.fi** Arrimaha ku saabsan lacag siinta ee loogu talaggalay macaamiisha khasnadaha shaqala'aanta (työttömyyskassa).

**Adeegyada telefoonada heerka qaran ee xafiiska shaqada waxaa ay bixiyaan talosiin guud inta u dhexeysa maalmaha isniin-jimce 9-16.15.**

**Adeegga telefoonka ee macmiilka shakhsiahaaneed:** luqadda finishka 0295 025 500, iswidhishka 0295 025 510, Ingiriiska 0295 020 713, afka ruushka 0295 020 715.

**Talosiinta ku saabsan caymiska shaqala'aanta (työttömyysturvaneuvonta) 0295 020 701.**

**Talosiinta waxbarashada 0295 020 702.**

**Hagista xirfadda shaqo (saykoljiiste qaabilsan hagista xirfadda shaqo) 0295 020 720.**

Adeegyada hagista xirfadda shaqo waxaad heleysaa maalmaha isniinta iyo khamiista, saacadda 12-16.

## Macluumaadka la soo xiriiridda

Marka aad ku reebto farriinta codsiga ee ah in lagula soo xiriiro adeegga loo yaqaan (Oma asiointi -palvelu) ee bogagga internetka (vantaanjakeravantyollisyyspalvelut.fi; te-palvelut.fi), Tababaraahaaga kuu gaarka ah ayaa kula soo xiriiraya.

**Vantaan kaupunki**  
**Työllisyyspalvelut**  
**Magaalada Vantaa**  
**Adeegyada shaqo helitaanka**  
PL 8201  
01030 VANTAA

**Keravan kaupunki**  
**Työllisyyspalvelut**  
**Magaalada Kerava**  
**Adeegyada shaqo helitaanka**  
PL 123  
04201 KERAVA

**Vantaan asiointipiste**  
**Barta dano dhammaysiga Vantaa**  
isniin-jimce saacadaha 9-16  
Vernissakatu 1, 1. krs  
01300 VANTAA

**Keravan asiointipiste**  
**Barta dano dhammaysiga Kerava**  
isniin-jimce saacadaha 9-16  
Aleksis Kiven tie 4, Kauppalantalo  
04200 KERAVA

**Vantaan Ohjaamo**  
**Ohjaamada Vantaa**  
isniin-jimce saacadaha 9-16  
Nuorten monitoimitila Liito (Xafiiska  
howlaha kala duwan ee dhallinyarada)  
Lummetie 2b C  
01300 VANTAA

**Keravan Ohjaamo**  
**Ohjaamada Kerava**  
isniin-jimce saacadaha 12-16  
Kauppakaari 11, katutaso  
(waddada la siman)  
04200 KERAVA

[vantaanjakeravantyollisyyspalvelut.fi](http://vantaanjakeravantyollisyyspalvelut.fi)



Vantaa



kerava



Työllisyyden  
kuntakokeilut